# دليل الحاج

# HAGAHA XAAJIGA

## Sidaad u gudan lahayd Xaj waafaqsan Xajkii Rasuulka ﷺ



Dr. C/nuur Faarax Cali

دار الفكر العربي

الألوكة
www.alukah.net

# دَلـيل الـحَـاج

# HAGAHA XAAJIGA

## Sidaad u gudan lahayd Xaj waafaqsan Xajkii Rasuulka ﷺ

Dr. C/nuur Faarax Cali

Daabacadda 2aad Qaahira
1439 - 2018

www.alukah.net
00201156800207

الألوكة
www.alukah.net
002011568002

بسم الله الرحمن الرحيم

الألوكة
www.alukah.net

الألوكة
www.alukah.net
0020115680020

# ARAR

الحمد لله رب العالمين والصلاة والسلام على المبعوث رحمة للعالمين سيدنا محمد وعلى آله وصحبه أجمعين ، وبعد ،،

Xajku wuxuu kamid yahay kuwa ugu fadli badan cibaadooyinka Allaah loogu dhawaado, cibaado walbana waxay u baahantahay in loo guto sidii sharcigu na amray, haddaba Kaddib markii aan arkay in xujay farabadani xajka gudanayaan iyagoo aan aqoon u lahayn qaabka loo guto iyo axkaamtiisa midna, oo ayan jirin cid hagaysa ama tusaysa habka loo xajiyo, dadka oo dhanna



www.alukah.net

ayan heli karin culimo gacan qabata, oo cibaadada uu samaynayo ka saxda, ayaan diyaariyay qoraalkan kooban, si'uu xaajiga uga caawiyo qaabkii uu u xajin lahaa, khaladaad badan oo xujaydu ku dhacaanna isaga ilaalin lahaa.

Waxaan isku dayay qoralkani inuu noqdo mid aad u kooban oo xaaji walbaa sidan karo inta uu xajka gudanayo, haddana xaajiga ku haga tillaabooyinka uu qaadayo marka uu xajka xirto illaa uu degaankiisa kusoo laabto, maalin walba camalka uu gudanayo iyo meesha uu ku gudanayo, iyo



الألوكة
www.alukah.net
00201156800207

khaladaadka iyo arrimaha Bidcada ah ee ay waajibka ku tahay xaajigu inuu iska ilaaliyo inta uu cibaadadaas qiimaha badan ku jiro, si tillaabo walba oo uu qaadayo ugu saleeyo sidii sharcigu na amray, xajkiisuna u noqdo mid Rabbi Raalli kayahay.

waxaa kaloon qoraalka ku tilmaamay axkaamta ragga iyo haweenku ku kala duwanyihiin, hadba meesha la marayo.

Waxaan aad ugu dadaalay inuu koobnaado qoraalku hawlaha xajka oo dhanna taabto,

Allaah waxaan ka baryayaa inuu



الألوكة
www.alukah.net
00201156800207

inta akhrisata ku anfaco anna ajar iga siiyo.

Cabdinuur Faarax Cali.

Nayroobi Shacbaan 1431

July 2010.

Nur.ali99@gmail.com



www.alukah.net

# XAJKA

Xajku waa tiir kamid ah shanta tiir ee islaamka, wuxuuna waajib ku yahay qof walba oo Muslim ah, qaan gaar ah, miyir qaba, dhaqaale ahaan iyo caafimaad ahaan awooda, oo Maxram haysta - haddii uu haween yahay, Cimrig-iisana hal mar inuu xajiyo ayaa qofka awooda waajib ku ah, Hadii uusan gudana wuxuu noqonayaa ruux waajib sharci ah katagay, oo dambi weyn galay, Haddii uu waajibnimada xajka inkirana culimada muslimiintu waxay isku waafaqeen inuu gaaloobayo diintana ka baxayo.



الألوكة
www.alukah.net

## FADLIGA XAJKA

Xajku wuxuu leeyahay fadli aad u weyn rasuulku ﷺ wuxuu sheegay qofkii xajka si wanaagsan u guta, isagoo aan dambi iyo xumaan galin inuu kasoo laabanayo asagoo dambi ka ah habaynkii hooyadi dhashay, wuxuu kaloo sheegay qofka xaajiga ah inuu maganta ilaahay ku jiro, ergay xag Alle u socdaalayna yahay, maamuus iyo xushmad gaar ah leeyahay, isagana aan loo ogolayn muran, gaf iyo xumaan kale inuu u hawoodo, Xaajiga waxaa waajib ku ah inuu xajkiisa u guto si aqooni ku dhisan-



الألوكة
www.alukah.net

tahay, wax walba oo uu samaynaya uu iska hubiyo inuu u sameeyey sidii sharcigu amray, haddiise uu hayin raac noqdo, oo dadku siday samaynayaan iska sameeyo isagoon culimo la tashan waxaa laga yaabaa inaan xajkiisu ansixin.

Xaajiga waxaa waajib ku ah inuu Allaah darti u xajiyo, xoolo Xalaal ah ku xajiyo, xuquuqda dadkana iska ilaaliyo, xumaan oo dhana iska dhawro inta uu waajibka gudanayo, sabir iyo dulqaadna kaashado. Waqtigiisana aad uga faa'idaysto oo uu sheekooyinka macna darada ah iyo fadhi-ku-dirirka iska ilaaliyo.



الألوكة
www.alukah.net
00201156800207

## INTAADAN XAJIN.

Xaajigu inta uusan xajka gudan waa inuu arrimhaan iska saxo:

- **TAWXIIDKA:** Wax ilaahay loogu dhawaado waxaa ugu wayn tawxiidka sidaas darteed xaajigu waa inuu tawxiidkiisa saxaa xajka kahor, iskana ilaaliyaa wax kasta oo tawxiidkiisa wax u dhimi kara sida; in cid aan Allaah ahayn la baryo, in qabri wax la waydiisto,in cid aan Allaah ahayn wax loo gawraco ama nadar loo galo, dhammaan waxyaabahaas iyo kuwa la midka ah ee tawxiidka ka hor



الألوكة
www.alukah.net

imaanaya shirkigana keenaya waa inuu xaajigu qalbigiisa ka nadiifiyo, maxaa yeelay mar hadii qofka tawxiidku ka khal-danyahay cibaado kale ilaahay kama aqbalo, Salaad, Soon iyo Xaj toona.

- **NIYADDA:** qofka Muslimka ah waa inuu Allaah darti u xajiyo, faan iyo halagaa sheego iska ilaaliyo, danta uu u xajinayaana noqoto inuu Allaah dambigiisa dhaafo, Cadaab ka bad baadiyo Jannana geliyo.
- **XOOLAHA:** xaajigu waa inuu hubiyo xoolahiisu inay xalaal



الألوكة
www.alukah.net

yihiin, wax walba oo xaaraam ahna uu faraha kala baxo, hanti-diisana saafi yeelo, kuwa uu ku xajinayo iyo xoolihiisa kale oo dhan.

- **XUQUUQDA:** Inuu xuquuqda lagu leeyahay iska bixiyo, hadduu xoolo dad ka hayo iska celiyo, hadii deyn lagu leeyahay iska gudo, wixii xan iyo xad gudub ah cidduu ka galay cafis ka dalbado.
- **TAWBAD KEEN:** markuu xaajigu caqiiqadiisa, niyaddiisa, xoolihiisa iyo xuquuqda dadka iska nadiifiyo waa inuu ilaahay uga tawbad keeno wax kasta oo dambi ah ee



الألوكة
www.alukah.net

ka dhacay, midkuu ku dhex jirana ka baxo.

## NOOCYADA XAJKA.

Marka laga eego qaababka loo xajiyo; Xajku wuxuu u qaybsamaa saddex qaybood:

- **TAMATUC:** oo ah inuu qofku xirto Cumro bilaha xajka dhexdooda, markuu guto kadibna uu sugo maalmaha Xajka oo uu xajiyo.
- **QIRAAN:** (xariirin), oo ah inuu xaajigu isla guto Xajka iyo Cumarada iskuna xariiriyo.
- **IFRAAD:** oo ah inuu qofku xaj kaliya xirto oo guto.



الألوكة
www.alukah.net

Qoraalkaani wuxuu ku salaysnaan doonaa nooca koowaad (TAMATUC) oo ah midka inta badan soomaalidu u gudato, oo ah noocii rasuulku ﷺ amray inay saxaabadu u xajiyaan, culimo aad u bandanna qabaan inuu yahay nooca ugu fadli badan, qofkii qaabkaas u xajiyana waxaa waajib ku ah inuu neef qalo, maalinta tobnaan ee xajka.

Haddaba noocan tamatuca la yiraahdaa waa in la kala saaraa xajka iyo cumrada oo midba mar la guto, marka qaabka loo cumraysto ayaan ku bilaabayaa kadibna sida loo xajiyo.



www.alukah.net

## XIRASHADA CUMRADA

Xaajigu intuusan Cumrada xiran waa inuu arrimahaan sameeyo:

- Inuu dharkii caadiga ahaa iska bixiyo oo qubaysto,

xattaa haweenka dhiigga qaba ama umulaha ah way qubaysan-ayaan markay xajka ama cumrada xiranayaan.

- Inuu is carfiyo, (haweenku haddii ay udug is mariyaan waa inuu noqdo mid ayan xujayda kale dareemayn).

- Inuu xirto dharka xajka lagu guto, oo ah labada go' ee kor iyo



الألوكة
www.alukah.net

hoos laga xirto, midab kastana waa la qaadan karaa, haddaysan ahayn dhar rinji lagu midabeeyey, waxaase fadli badan dharka cad cad. Haweenka iyagu dharkooda caadiga ah ayay ku xajinayaan laakiin looma ogola indhash-areerka wejiga ku dhagan.

Dharka xajka waxaa la xirtaa intaan la gaarin meesha xajka laga xiranayo, waxaana bannaan qofku inuu diyaaradda ku raaco dharka xajka si markuu gaaro meesha cumrada laga xirto uusan u dhibtoon.



الألوكة
www.alukah.net
00201156800207

## MEELAHA XAJKA IYO CUMRADA LAGA XIRTO.

Waxaa jira shan goobood oo xadidan oo uusan qofku dhaafi Karin isagoo aan Xaj ama Cumro xiran, haduu dhaafana ay ku waajibayso fidyo,

oo ah inuu neef qalo. Dadka kasoo xajinaya dhanka Yemen oo ay soomaaliya dadka ka imaanayaa ku jiraan waxay ka xirtaan meesha lagu magacaabo YALAMLAM oo qiyaasta 30 mayl u jirta Makkah. Marka xaajigu waa inuu iska hubiyaa inuusan dhaafin goobtaas isagoo aan Xajkii ama Cumradii xiran.



www.alukah.net

## QAABKA XIRASHADA CUMRADA.

Xaajigu marka uu gaaro goobta uu Cumrada ka xiranayo, wuxuu niyaysanayaa cumrada wuxuuna oranayaa LABAYKALLA-AHUMA CUMRATAN (لبَّيكَ اللَّهُمَّ عُمْرَةً).

Kadibna wuxuu u jeesanayaa qiblada wuxuuna oranayaa:

" اللَّهُمَّ عمرة لَا رِيَاءَ فِيهَا وَلَا سُمعَةً"

“ilaahow iiga yeel Cumro aan is tustus iyo halagu arko ahayn”

kadibna wuxuu kor u qaadayaa Talbiyadaan:



الألوكة
www.alukah.net

"لَبَّيْكَ اللَّهُمَّ لَبَّيْكَ، لَبَّيْكَ لاَ شَرِيكَ لَكَ لَبَّيْكَ، إِنَّ الْحَمْدَ، وَالنِّعْمَةَ، لَكَ وَالْمُلْكَ، لاَ شَرِيكَ لَكَ"

Talbiyadaan in lagu celceliyo

oo aad kor loogu qaado fadli badan ayay leedahay, wax walba oo dhulka dul saaranna way la qaadayaan xaajiga Talbiyada, sida geedaha, ciidda iyo dhagxaanta.

Talbiyadaas ayuu kor u qaadayaa oo ku celcelinayaa ilaa uu ka yimaado Makkah, oo guryaheedu u muuqdaan, markaas ayuu joojin-ayaa Talbiyada, oo bilaabayaa hawlaha Xajka.



الألوكة
www.alukah.net

Waxaa sunno ah in marka Makka lagalayo la qubaysto qofkii awooda.

## WAXYAABAHA XAARAAMTA KA AH QOFKA CUMRADA XIRTAY.

Xaajigu markuu Xaj ama cumro xirto waxaa xaaraam ka noqonaya inta uu Xajka ama Cumrada dhama-ysanayo waxyaabaha soo socda.

**A.** Xiriirka ragga iyo haweenka dhex mara, sida isku tagga, ama xiriirka gogoleed, is-taataab-ashada, sheekada guurka ku saabsan iyo shukaansiga.

**B.** Inuu guursado (Ragga), ama la guursado (haweenka), ama uu



الألوكة
www.alukah.net
00201156800201

qof kale caqdi nikaax wakiil ooga noqdo, sidoo kale inuu gabar doono ama la doono haddii qofka xajinayaa haween yahay ma bannaana.

**C.** Inuu ciddiyaha ama timaha jaro, ama xiirto.

**D.** Xirashada indhashareerka (dumarka).

**E.** Inuu is carfiyo, ama wax udgoon is mariyo.

**F.** In uu dilo xayawaan ama ugaarsado.

**G.** Inuu xirto dharka la tolay ee jirka lagu qaabeeyey, sida



الألوكة
www.alukah.net

surweellada, shaaatiyada, qamiisyada, iskaalshaha, gacmagashiga (galofis)

iyo xattaa kabaha xiran ee anqowga qarinaya. (dhammaan waxyaabahaan waxay gaar ku yihiin ragga oo kaliya ,dumarka waa loo ogolyahay waxaan ka ahayn Gacma gashiga iyo indha shareerka wajiga ku dhagan labadaas dumarka looma ogola)

**H.** Madaxa oo lagu daboolo koofiyad ama cimaamad.

sidoo kale Labadaan qodob ee dambe ragga ayay gaar ku yihiin.



www.alukah.net

# KHALADAADKA WAQTIGA XIRASHADA XAJKA AMA CUMRADA.

Waxaa jira khaladaad ay xujayda qaarkood galaan xilliga xirashada, waxaana kamid ah:

1. **Xirashada dharka iyo xirashada Xajka oo la isku khaldo**: xaajigu waa inuu ogaado in dharka oo la xirtaa ayan macnaheedu ahayn inaad xajkii xiratay, taasina waa khalad, xajka ama cumrada xirashadoodu waxay u baahan-yihiin Acmaal gaar ah, oo dheeri ka ah xirashada dharka.



www.alukah.net

2. **Goobtii xirashada oo la gudbo iyadoon xaj la xiran:**waxaa jira xujay fududaysta inay xajka ka xirtaan meesha loo xadiday, oo gudba goobtaas ayagoon xajkii xiran, arintaasina waa khalad.

3. **Haweenka oo dhar cad cad oo jilicsan xirta:** Haweenka waxaa waajib ku ah inay xijaab jirkooda oo dhan astura xirtaan, hadday xajinayaan iyo haddii kalaba, umana banana marnaba inay maryo jilicsan xirtaan, go'yaasha cad cad ee lagu xajiyaana raga ayay gaar u yihiin.



الألوكة
www.alukah.net

4. **Haweenka oo ixraamka u dib dhiga caadada darteed:**

Haweenka dhiigga caadada ama kan umusha qabaa sida dadka kale ayay xajkooda u xiranayaan, waxa kaliya oo ay xujayda kale uga duwanyihiin waa inay dawaafka dib dhigaan ilaa ay caadada ka qubaystaan.

5. **Garabka oo la faydo marka xajka la xirto (ID-DHIBAAC):** garabka oo la faydaa waxay sunno tahay oo kaliya marka dawaafka koowaad ee dawaaful-quduumka ama dawaafka Cumrada la samaynayo, ee marka xajka la xirto ma'aha.



الألوكة
www.alukah.net

# HABKA LOO CUMRAYSTO.

Marka uu qofku xaramka galayo wuxuu u galayaa qaabka masaajida loo galo oo kale, bisinka iyo adkaarta masjidka lagu galo ayuu akhrisanayaa, ka dibna lugta midig ayuu hor gelinayaa, wuxuuna ku ducaysanayaa:

بسم الله والصَّلاةُ والسَّلامُ عَلَى رسُولِ الله، اللَّهُمَّ اغفِر لي ذُنُوبِي، اللَّهُمَّ افْتَحْ لي أبْوابَ رَحْمَتك ، أَعُوذُ بالله العَظِيم وبِوَجْهِهِ الكريم وسُلْطَانِهِ القَديم مِن الشَيطانِ الرَّجِيم"

ka dibna wuxuu ku bilaabayaa inuu xajarul aswadka dhunkado, haduusan awoodina gacantiisa inta



الألوكة
www.alukah.net

ku taabto shumiyo, haduu kari waayana uu kor ka salaamo.

## DAWAAFKA CUMARADA.

Xaajigu marka uu masjidka galo salaad suno ah ama taxiyatul-masjid ma tukanayo, tillaabada ugu horeysa ee uu qaadayaa waa inuu guto dawaafka Cumrada, isagoo ka bilaabaya meesha ku aaddan xajarul aswadka[1], wareeg kastana

---

([1]) Xajarul aswad: waa dhagaxa Madaw ee kacbada ku jira, markiisii horana isaga oo caanaha ka cad ayaa Jannada laga keenay, dambiyada dadka taabanaya ayuu la madoobaaday, qof walba oo taabtana maalinta qiyaamaha wuu u markhaati furaa, ee ku dadaal inaad taabatid haddaan dhib kaaga imaanayn ama aadan dadka kale ku dhibayn.



الألوكة
www.alukah.net

wuxuu ku egyahay xariiqa ku aaddan xajarul aswadka ee markii hore laga bilaabay, mar walba oo uu xajarul aswadka ku aadkiisa marayana wuxuu leeyahay Allaahu Akbar, toddobo jeer ayaa sidaas la samaynayaa.

Dawaafkan wuxuu dawaafyada kale uga duwanyahay labo arrimood:

1. waxaa sunno ah ID-DHIBAAC oo ah in garabka midigta ah la faydo, kan bidixena la dado, go'ana kilkisha midige hoosteeda laga rido.

2. dawafkaan sadexdiisa wareeg ee hore waa la ruclaynayaa hadday



www.alukah.net

suuro gal tahay afarta dambana caadi ayaa loo soconayaa.

labadaan arimoodna ragga ayay gaar u yihiin, haweenka lagama rabo.

Dawaafku malaha duco u gaar ah, ee waxaa laga rabaa xaajigu inuu ducada iyo qur'aan akhriska iyo xuska Allaah badiyo inta uu dawaafayo.

Dawaafkana looma ogola haweenka dhiigga caadada qaba iyo kuwa umusha ku jira midna.

Waxaa xaajiga laga rabaa inuu daahir yahay marka uu dawaafayo oo weyso qabo, inta uu dawaafka



الألوكة
www.alukah.net
00201156800207

kujiro haddii weysadu ka jabtana waa inuu weysaysto oo dawaafkiisa sii wato(1).

Marka uu dawaafka dhamaysto garabka ayuu dedayaa, wuxuuna labo rakco ku tukanayaa meesha ku toosan maqaamu Ibraahiim(2),

---

(1) Waxaa axaadiith-ta ku cad inaysan haweenka dhiigga qaba u banaanayn inay dawaafaan ilaa dhiiggu ka go'o oo ay qubaystaan, waxaana lamid ah qof walba oo qubays ku waajibay, dadka weysadu ka jabtaana mala mid baa?, culimadu waa isku qabteen, waxaana wanaagsan marka aad dawaafaysid inaad weyso qabto si'aan xajkaagu u noqon mid muran ku jiro inuu ansaxay iyo in kale.

(2) Maqaamu Ibraahiim: waa dhagaxii uu nebi Ibraahiim calayhi salaam ku=



www.alukah.net

haduusan awoodina meel walba oo masjidka kamid ah ayuu ku tukanayaa, wuxuuna ku akhrinayaa Faatixada kadib, suurasada Al-kaafiruun rakcada koowaad iyo Al-Ikhlaas rakcada labaad.

Kadibna wuxuu aadayaa biyaha ZamZamka oo uu cabayaa madaxana isaga shubayaa. Biyaha Zamzam-kuna waa biyaha dhulka yaal kuwa ugu fadli badan waana daawo, qofkuna wuxuu niyaysto inuu ka helayo ayaa rasuulku ﷺ noo sheegay.

---

=taagnaa markii uu kacbada dhisayay, raadkiisii ayaana weli ka muuqda, asagoo muraayad ku jira ayuu kacbada agteeda yaal.

Kadib wuxuu ku laabanayaa xajarul Aswadka oo taabasho iyo ishaaro midkuu awoodo ku salaam-ayaa.

## KHALADAADKA LA GALO MARKA LA DAWAAFAYO.

Khaladaadka xujayda ka dhaca xilliga la dawaafayana waxaa kamid ah:

1. **Isku xoog sheegasho iyo is dulmin:** qofka muslimka ah uma bannaana isagoo raadinaya fadliga taabashada xajarul aswadka inuu dadka kale dhibo ama dadka dawaafaya carqalateeyo, taasoo laga yaabo inay shil keento.



الألوكة
www.alukah.net

2. **Darbiyada Kacbada oo la isku xoqo lana barakaysto.**

Arintaasina waa khalad kale, kamana mid ahayn dhaqankii rasuulka ﷺ iyo asxaabtiisa, marka in maryaha kacbada iyo darbiyadeeda xabadka lagu dhedhejiyo, ama inta gacanta lagu masaxo la shumiyo waa bidco aan diinta sal iyo raad ku lahayn ee xaaji iska ilaali.

3. **Ducooyin gaar ah oo dawaafka loo degsaday:** ducooyinka la sheego in dawaafka loo akhristo wareeg walbana mid loo same-eyey waa bidco aan ka mid ahayn xajkii rasuulku ﷺ na baray.



www.alukah.net

4. **Wareegyada dawaafka oo dhan in la ordo:** Orodka yar ama rucalayntu waxay gaar ku tahay sadexda wareeg

ee hore ee dawaaful-quduumka, ama dawaafka cumrada, laakiin afarta wareeg oo dambe si caadi ah ayaa loo soconayaa.

5. **Xijru Ismaaciil iyo kacbada dhexdooda oo lagu dawaafo.**

Qofku marka uu dawaafayo waa inuu Xijrul-Ismaaciil[1] gadaal ka maro, sababtoo ah Xijrigu wuxuu

(1) Xijru Ismaaciil: waa qaybta derbigu ku wareegsanyahay ee daarad ahaanta ah ee dhinaca galbeed ee Kacbada ku taal.



الألوكة
www.alukah.net

kamid yahay kacbada, haduu xijriga sokodiisa dawaafo, wareegaas waxba kama jiraan oo wuu kusoo celinayaa.

6. **imaamka ka hor oo salaadda laga baxo:** Waxaa jira dad imaamka kahor salaadda ka baxa oo xajarul aswadka ku yaaca si'ay u shumiyaan una taabtaan, arintaasina waa khalad aad u weyn salaaddiina burinaysa.
7. **Sunada Dawaafka ka dambaysa oo lagu tukado meelaha dadku ku dawaafayaan.** Salaadda lagu tukado Maqaamu Ibraahim gadaashiisa haddii cariiri jiro waxaa bannaan in lagu tukado



الألوكة
www.alukah.net

meel walba oo Masjidka kamid ah.

### 8. Biyaha ZamZamka oo wax aan ku jirin laga doono.

Biyaha ZamZamku waa biyo barakaysan waxaana loo cabbaa caafimaad iyo in lagu oon baxo, laakiin in dharka inta lagu dhaqdo Baraka ahaan loo haysto, ama maradaas Zamzamka lagu dhaqay kafan ahaan loo xanaanaysto waa bidco aan diinta meel uga jirin.

## SACYIGA SAFA IYO MARWA U DHEXEEYA.

Intaas kadib, xaajigu wuxuu aadayaa buurta Al-safaa, wuxuuna



الألوكة
www.alukah.net

akhrinayaa aayadda qur'aanka ah:

﴿ ۞ إِنَّ ٱلصَّفَا وَٱلۡمَرۡوَةَ مِن شَعَآئِرِ ٱللَّهِۖ فَمَنۡ حَجَّ ٱلۡبَيۡتَ أَوِ ٱعۡتَمَرَ فَلَا جُنَاحَ عَلَيۡهِ أَن يَطَّوَّفَ بِهِمَاۚ وَمَن تَطَوَّعَ خَيۡرٗا فَإِنَّ ٱللَّهَ شَاكِرٌ عَلِيمٌ ١٥٨ ﴾ [البقرة ].

Wuxuu kaloo oranayaa "نَبْدَأُ بِمَا بَدَأَ اللهُ بِهِ".

Wuxuu fuulayaa buurta (dalcadda) Al-safaa, wuxuu u jeesanayaa dhinaca Kacbada, markuu kacbada arko ayuu saddex jeer oranayaa Allaahu Akbar, kadibna wuxuu oranayaa:

(لَا إِلَهَ إِلاَّ اللهُ وَحْدَهُ لاَ شَرِيْكَ لَه، لَهُ الْمُلْكُ وَ لَهُ الْحَمْدُ يُحْيِي وَ يُمِيْتُ وَ هُوَ عَلَى كُلِّ شَيْءٍ

قَدِيْر؛ لاَ إِلَهَ إِلاَّ اللهُ وَحْدَهُ لاَ شَرِيْكَ لَه، أَنْجَزَ وَعْدَهُ وَ نَصَرَ عَبْدَهُ وَ هَزَمَ الأَحْزَابَ وَ حْدَه).

Saddex jeer ayuu ku celcelinayaa, mar walba oo uu dhameeyana aad ayuu u ducaysanayaa oo u Alla baryayaa.

Kadibna wuxuu u dhaqaaqayaa dhanka MARWAH, dalcadda MARWA markuu fuulana intii uu ku sameeyey buurta Safa korkeeda ayuu ku samayanayaa, ducooyinkii, adkaartii iyo takbiirtiiba wuu samaynayaa. Sidaas waxaa ku dhamaanaya wareega koowaad, marka uusoo laabtana sidii oo kale



الألوكة
www.alukah.net

ayuu buurta Safa korkeeda ku samaynayaa, ilaa uu wareega todobaad ku dhameeyo MARWAH.

**F.G.** Khadka cagaaran ee labada dalcadood u dhexeeya markuu marayo waxaa sunno ah inuu xaajigu dheereeyo, ama rucleeyo.

## TIMO XIIRASHO.

Markuu xaajigu sacyigaas dhameeyo wuxuu xiiranayaa ama jaranayaa timaha, haddii xajkiisu Tamatuc yahayna waxaa u fadli badan inuu jarto, maalinta tobna-adna xiirto, sidaas ayayna cumr-adiisii ku dhamaatay, wax walba oo markuu Cumrada xirtay xaaraam



الألوكة
www.alukah.net

ka noqdayna xalaal ayay u noqon-ayaan, ilaa uu maalinta sideedaad Xajka xirto.

Muddadaas waxaa laga rabaa xaajigu inuu cibaadada badiyo, salaadaha iyo qur'aan akhriska ku dadaalo, ducada iyo Alla-bariga uusan afka ka qaadin, dhulka iyo waqtiga barakaysan iyo firaaqada uu ka faa'idaysto.

## KHALADAADKA WAQTIGA SACYIGA LA GALO.

1. **Safa iyo Marwa inta u dhaxaysa oo la rucleeyo (ordo):** Sida saxda ahi waa in la socdo inta u dhaxaysa Safa iyo Marwa, khadka



الألوكة
www.alukah.net

cagaaran marka la maryana la rucleeyo, marka in Safa iyo marwa dhexdooda oo dhan la ordaa waa khalad ee iska ilaali.

2. **Salaadda oo lagu jiro oo Sacyiga la wato**: haddii la aqimo salaadda waa in Xaajigu socodka joojiyo, salaaddana jamaacada la tukado kadibna uu socodkiisa meeshuu marayay kasii wato, laakiin in Salaadda jameecada la dayacaa arin Xaaji ku haboon ma'aha.

3. **Darbiyada Safa iyo Marwa oo la barakaysto**: ama la isku xoqo, xabadka lagu dhajiyo, inta



www.alukah.net

la isku masaxo lagu dul ooyo, arrimahaas oo dhani waa bidco xaaraam ah.

4. **Wareeg walba oo Duco gaar ah la isla akhriyo:** In wareeg kasta duco gaar ah loo samaysto arin banaan ma'aha, ee xaajigu inta uu socodkaas ku jiro waa inuu wardiga, Alla bariga iyo qur'aan akhriska ku dadaalo.

## QAABKA XAJKA LOO GUTO.

Hawlaha xajka xoogoodu wuxuu socdaa maalinta sideedaad ee bisha Dul-xijjah ilaa maaalinta sadex iyo tobnaad, lixdaas maalmood hawlaha la qabto ayaan maalin maalin u



الألوكة
www.alukah.net
00201156800207

sharxayaa insha Allaah, si xaajigu maalin kasta meesha uu marayo hawsheeda uga taxadaro.

## HAWLAHA MAALINTASIDEEDAAD XIRASHADA XAJKA

Marka la gaaro maalinta sideedad ee bisha Dulxajah ayaa xaajigu isku diyaarinayaa xirashada Xajka, asagoo samaynaya waxyaabihii uu sameeyey markii uu Cumrada xiranayay, sida qubayska, is carfinta, xirashada dharka Xajka, wuxuuna hajka ka xiranayaa meesha uu joogo, asagoo oranaya **LABBAYKALLAAHUMMA BI XAJJIN.**

(لَبَّيْكَ اللَّهُمَّ بِحَجٍّ)



الألوكة
www.alukah.net

## AADIDDA MINA.

Kadib wuxuu u guurayaa MINA, oo ku tukanayaa salaadaha Duhur, Casar, Maqrib, cishe iyo Subxiga maalinta sagaalaad (Carafo). Salaad walbana waqtigeeda ayaa la tukanayaa, laakiin waa la gaabinayaa oo Duhurka, Casarka iyo Cishaha Min laba Rakco ayaa la tukanayaa.

## KHALADAADKA MARKA MINA LA DAGO LA GALO.

1. **Salaadaha oo MINA lagu jamciyo:** inta Xajka la gudanayo salaad walba waqtigeeda ayaa la tukanayaa marka laga reebo Carafa oo Duhur iyo Casar lagu



الألوكة
www.alukah.net

jamcinayo iyo Muzdalifah oo maqrib iyo Cishe lagu jamcinayo.

2. **Muran iyo dagaal badan oo la galo**: Marka Mina la yimaado waxaa inta badan la isku qabsadaa teendhooyinka iyo meelaha la seexanayo, maalintaas qof kastaa wuxuu isku mashquuliyaa inuu meel uu dego helo xaq iyo xaqdaro kuu ku helaba. Arrim-ahaasina waxay ka midyihiin waxyaabaha xaajiga Xaaraanta ka ah, xajkana buriya ama ajarkiisa dhaawaca, marka xaaji aad isku ilaali, sabir iyo dulqa-adna kaasho, murankuna inuu xaajiga Xaaraam ka yahay mar walba xusuusnow.



الألوكة
www.alukah.net
00201156800207

# HAWLAHA MAALINTA SAGAALAAD

Maalinta salaagaad waa maalinta carafa, waana maalinta ugu fadli badan maalmaha sanadka waa maalinta Allaah ﷻ uu dadka carafa taagan ku yiraahdo waan idiin dambi dhaafay adinka iyo cidii aad u shafeecdaanba (ka ergaysaan oo Allaah u baridaan)[1], Waxaa rasuulka ﷺ lawaydiiyay fadliga ay leedahay maalinta Carafo soonkeeda? Wuxuu yiri: *"Waxaa lagu dhaafaa*

---

([1]) Wuxuu qayb ka yahay xadiith dheer oo fadliga xajka faah faahiyay, waxaad ka akhrisaa,Saxiix At-tarqiib wat-tarhiib xadiiska lambarkiisu yahay 1112.

*sanadkii hore iyo sanadka soo socda danbiyadii aad gashay."* Soonk-aasna wuxuu sunno u yahay dadka aan xajinayn.

Wuxuu kaloo rasuulku ﷺ yiri: *"Xajku waa Carafa"*, marka camalka ugu culus uguna fadli badan acmaasha xajku waa tegidda iyo ku Alle-bariga Carafa.

## AADIDDA CARAFA.

Subaxa sagaalaad marka ay qorraxdu soo baxdo ayuu xaajigu u dhaqaaqayaa Carafa, isaga oo Takbiiranaya ama talbiyaysanaya, carafa marka uu gaarana wuxuu ku tukanayaa waqtiga salaadda duhur;



www.alukah.net

duhur iyo Casar isagoo gaabinaya oo mid walba laba rakco ka dhigaya, hal addin iyo laba aqim ayuu ku tukanayaa, wax sunno ah oo u dhaxaysana ma jirto.

Kadib wuxuu xaajigu tagayaa meeshii uu ku ducaysan lahaa, gacmaha ayuu kor u taagayaa, qiblada ayuu u jeesanayaa, inta maalinta ka hartay oo dhanna wuxuu ku jirayaa Alle bari, tawbad keen iyo duco, tawxiidkana wuu badinayaa, rasuulku ﷺ wuxuu yiri waxaa ugu fadli badan eray aan niraahno maalinta carafa aniga iyo nebiyadii iga horreeyey:



الألوكة
www.alukah.net

" لَا إِلَهَ إِلاَّ اللهُ وَحْدَهُ لاَ شَرِيْكَ لَه، لَهُ المُلْكُ وَلَهُ الْحَمْدُ وَ هُوَ عَلَى كُلِّ شَيْءٍ"

Ducadaas iyo tawxiidkaas ayuu wadayaa ilaa qorraxdu ka dhacdo, maalintaasna dad aad u fara badan ayaa naarta laga xoreeyaa, marka xaajigu waa inuu aad u dadaalo inuu fursaddaas ka faa'idaysto, inuu maalintaas dambiyadiisii oo dhan iska dhaqana ku dedaalo, dadka kale ee muslimiinta ahna u duceeyo, Fadlan anigana ducadaas ha'iga illoobin.



الألوكة
www.alukah.net

## KHALADAADKA MAALINTA CARAFA LA GALO.

1. **Xuduuda Carafa banaankeeda oo waqtiga lagu dhameeyo.** In Maalinta sagaalaad Carafa la tago, oo waqti maalinta kamid ah la joogo, waa tiir kamid ah tiirarka xajka, haddiise uu xaajigu carafa banaankeeda kasoo laabto xajkiisii waxba kama jiraan, marka xaaji iska hubi meesha aad maalintaas joogtaa inay Carafa xuduudeeda kamid tahay oo aysan banaankeedii ahayn.

2. **Fadhi ku dirir iyo maxaa la dheegay?:** xaaji ku dadaal inaad



www.alukah.net

maalintaas towbad keento, wardiga iyo ducadana aad u badisid, iskana ilaali inaad fadliga maalintaas ku dayacdid Maalaa-yacni iyo maxaa la dheegay, xumaantii lagasoo xajiyay ee wadankeena kharibtayna xajka hala imaan, meel lagu hayo haddaad aragtana ka carar.

3. **Jabalu Raxmah korkiisa oo la isku ciriiriyo:** Waxaa jira dad isku ciriiriya oo aad ugu dadaala buurta JABALU RAXMAH inay korkeeda fuulaan, dhaqxaanteeda barakaysta, arrima-haasina waa bidco aan sal ku lahayn sunnada nebiga ﷺ ee iska ilaali xaaji.



الألوكة
www.alukah.net

4. **Qorrax-dhaca kahor oo Carafa laga laabto:** Xaajigu waa inuu Carafa xuduudeeda kujiro inta qorraxdu ka dhacayso, sidaas ayaa rasuulku ﷺ sameeyey.

## KASOO GEDOONKA CARAFA.

Xaajigu maalinta carafa oo dhan sida uu ducadaas u wado ayuu marka qorraxdu dhacdo wuxuu usoo guurayaa MUZDALIFAH, isagoo degan oo jawi cibaado iyo Alle ka cabsi ku jira, markuu Muzdalifah yimaadana wuxuu ku tukanayaa Maqrib iyo Cishe oo uu cishaha gaabinayo, cishaha kadib asagoo aan sunno tukan ayuu seexanayaa



www.alukah.net

ilaa salaadda Subax la gaaro, maadaama ay shaqo aad u adagi sugayso maalinta tobnaad.

## KHALADAADKA HABAYNKA MUZDALIFAH LA GALO.

1. **Muzdalifah banaankeeda oo la seexdo:** Xaajigu waa inuu hubiyo meesha uu habaynkaas jiifaa inay kamid tahay xuduuda Muzdalifah, meeshii uu ku daalo inuu gogosha dhigto ma'aha.

2. **Dhagax aruursiga oo la isku mashquuliyo:** Waxaa jira dad habaynkaas oo dhan ku mashq-uulsan dhagax aruursasho, oo aad isugu mashquuliya quruurixii



www.alukah.net

ay maalmaha soo socda oo dhan tuuri lahaayeen inay habaynkaas caag ku gurtaan, arintaasina sunnada raad kuma laha, quruuraxa waxaa laga helayaa Mina, quruurax waayi mayside habaynkaas iska naso.

3. **Habaynka Muzdalifah oo la dhafro:** habaynkaas waa inuu xaajigu cishaha kadib horey ka seexdo oo nasto, habaynkaas xataa rasuulku ﷺ salaad sunno ah ma tukan, sheeko iyo haasaawena warkoodaba daa.

4. **Muzdalifah oo aan habaynkii lagu baryin:** habaynkaas xaajigu



www.alukah.net

waa inuu Muzdalifah ku baryo, oo salaadda subax ku tukado, inay habaynkaas Muzdalifah ka dheelmadaan waxaa loo ogolyahay haweenka, dadka tabarta yar iyo dadka xujaydda u adeegaya oo kaliya.

## HAWLAHA MAALINTA TOBNAAD

Maalinta tobnaad marka salaadda subax lagu tukado Muzdalifah Xaajigu wuu ducaynaysanayaa, Takbiirta, tawxiidka iyo Alla-bariga ayuu wadayaa ilaa waagu si fiican u caddaado, intayan qorraxdu soo bixin ayuu u dhaqaaqayaa Mina hawlihii xajka ee maalinta tobnaad ayuu halkaas ka wadayaa:



الألوكة
www.alukah.net

**F.G.** haweenka iyo dadka xooga yar waxaa loo baneeyey inay habaynkaas sii dheelmadaan oo MINA sii tagaan, dhagaxana tuurtaan habayn barka wixii ka dambeeya, xilliga salaadda Subax, ama marka qorraxdu soo baxdo[1].

## 1. DHAGAXTUURKA

Shaqada ugu horaysa ee maal-intaas xaajigu qabanayaa waa inuu dhagaxtuurka sameeyo, quruurax yar yar oo digirta waaweyn le'eg

---

(1) Culimadu waa isku khilaafeen waqtiga ay dhagaxa tuuran karaan dadka inay siidheelmadaan loo idmay, sida aan kor ku xusay ayaana mooddaa ina axaadiistu u badan tahay.



www.alukah.net

ayuu xaajigu sii aruursanayaa, kadibna sadexda god midka ugu shisheeya marka mina laga yimaado ayuu toddoba dhagax ku tuurayaa, mid walba marka uu tuurayana wuxuu leeyahay Allaahu akbar, dhagaxa ugu dambeeya marka uu tuurana wuxuu joojinayaa Talbiyadii.

Dhagaxana waxaa la tuurayaa wixii qorrax soo baxa ka dambeeya, haduusan xaajigu kamid ahayn dadka cudur daarka leh ee aan soo tilmaamay.

Xaajigu marka uu dhagax-tuurka dhameeyo waxaa u xalaal-oobaya wax walba oo markii uu



www.alukah.net

xajka xirtay xaaraam kanoqday, marka laga reebo haweenka,

waxaase shardi ah si'uu xaajigu ruqsadaas u helo inuu isla maalintaas dawaafka xajka guto, hadduu gudan waayana rukhsadaas mahelayo, wax walba oo xirashada xajka uga xaaraam noqdayna uma banaanaanayaan.

## KHALADAADKA WAQTIGA DHAGAX-TUURKA LA GALO.

A. **Dhagxaan waaweyn la tuuro:** Sunnaduna waa dhagxaan yar yar oo digirta le'eg in la tuuro.

B. **Quruuraxa oo aan la hubin inuu godka ku dhacay.** oo la



الألوكة
www.alukah.net

iska tuuro haddaan, quruuruxu godka ku dhex dhicin waa in lagu celiyo oo mar kale la tuuro.

C. **Waqtiga hore oo la isku cariiriyo dhagax-tuurka:** waxaa bannaan in dhagaxa la tuurto maalinta oo dhan xataa habaynkii, marka xaaji rukhsadaas ka faa'idayso oo cariiriga ha isku dilin.

D. **Lacnad iyo Haaraan lagu daro dhagax-tuurka:** Xaajigu marka uu dhagaxa tuurayo shaydaan ma hor taagna, marka cay iyo lacnad lama ogola, ee waxaad oronaysaa markaad dhagaxa



الألوكة
www.alukah.net

tuuraysid ALLAAHU AKBAR. Sidaas ayaana sunno ah.

E. **Quruuraxa la tuurayo oo la dhaqo:** Waa arrin khalad ah oo aan ka sugnaan rasuulka ﷺ iyo saxaabadiisa. Waana bidco ee xaaji iska ilaali.

F. **Dhagax tuurka oo qof kale loo wakiisho:** Xaajiga waxaa waajib ku ah inuu dhagaxa asagu tuurto haddii aan tabar dari ama xanuun u diidin, marka waa khalad inuu cid wakiisho cudur-daar sharci ah la'aanti.



الألوكة
www.alukah.net

## 2. QALIDDA XOOLAHA HADYIGA.

Markaas ayuu xaajigu neefkii hadyiga ahaa qalayaa waxaa sunno ah inuu xaajigu gawraco neefka, waxaase u banaan inuu qof kale u wakiisho, qofkii waxaa laga rabaa neef Ari ah,

waxaa kaloo bannaan in todoba qof neef geel ah ama lo'ah isla qalaan.

Marka uu naafka gawracayana wuxuu oranayaa:

"بِسْمِ اللَّهِ وَاللهُ أَكْبَرُ اللَّهُمَّ مِنْكَ وَلَكَ اللَّهُمَّ تَقَبَّلْ مِنِّي"

Haddii xaajiga Hadyi ku waajibay oo uusan awoodin wuxuu soomayaa



الألوكة
www.alukah.net

toban maalmood, sadex kamid ah wuxuu soomayaa inta xajka la joogo, toddobada kalana markuu degaankiisii u laabto.

Xoolaha waxaa la qali karaa maalinta tobnaad iyo sadexda maalmood ee ka dambaysa. Xaajigu hilibka neefka uu qalay inuu wax ka cuno, qayb kamid ahna dhulkiisii u qaato waa u banaantahay.

## 3. TIMA JARRIDDA AMA XIIRASHADA.

Kadib xaajigu timaha ayuu jaranayaa ama xiiranayaa, waxaana fadli badan inuu xiirto, hawee-



الألوكة
www.alukah.net

nkana xiirasho looma ogola ee timaha ayay wax yar ka jarayaan iyagoo jooga meel asturan.

Sunnaduna waa midigta in laga bilaabo markasta oo timaha la jaranayo ama la xiiranayo, In madaxa qaybtiisa Bidix laga bilaabo waa khalad.

## KHALADAADKA MARKA TIMAHA LA XIIRANAYO

A. **Qiblada oo loo jeesto:** In marka timaha la jaranayo qiblada loo jeesto waa dhaqan bidco ah oo aan diinta sal ku lahayn.

B. **Garka oo la xiiro ama la jaro**: gar-xiir nimaduna waa dhaqan



www.alukah.net

gaalo kumana haboona xaaji, rasuulkuna ﷺ wuxuu na amray inaan gaalada khilaafno oo garka daysano, markay gaaladu dhulka muslimiinta qabsadeen ayaa dhaqankoodii lagu faanay, arintaasina waa musiibooyinka muslimiinta haysta mid kamid ah.

C. **Meelaha dadku deganyihiin oo lagu xiirto:** xaajiguna waa inuu nadaafadda dhawro oo meelaha daku deganyihiin ama cuntada ku karsadaan iska ilaaliyo.

## 4. DAWAAFKA XAJKA (DAWA-AFUL-IFAADAH).



الألوكة
www.alukah.net

Kadib xaajigu wuxuu aadayaa Makka wuxuuna samaynayaa daw-aafkii xajka, iyo sacyiga Safa iyo Marwah ee ka dambeeya, siduu dawaafkii cumarada ama dawaaful-quduumkii sameeyey oo kale ayuu samaynayaa, marka laga reebo laba qodob:

**A.** Dawaafkaani wax orod ah malaha ee caadi ayaa loo soconayaa, todobadiisa wareegba.

**B.** Dawaafkan marka la samaynayo garabka lama faydayo ee si caadi ah ayaa marada loo hago-oganayaa.

Maalinta tobnaad afartaas hawlood ayaa la qabtaa, waxaa xusid mudan laba arrimood:



www.alukah.net

**A.** Marka uu xaajigu afartaas hawlood dhameeyo waxaa u banaanaanaya wax walba oo markuu xajka xirtay xaaraan ka noqday, sida xirashada dharka caadiga ah, is carfinta, raga iyo haweenkooda oo isku banaa-naaya, laakiin xaajigu waa inuu hubiyo neefkii Hadyiga ahaa in la qalay hadduu dad u wakiishay.

**B.** Afartaas hawlood waxay u kala horeeyaan sida aan tilmaanay, (dhagax-tuur, xoolo qalid, madax-xiirasho, dawaafka iyo sacyiga la socda). Waxaase banaan in lays daba mariyo oo



الألوكة
www.alukah.net

tusaale ahaan dawaafka ama madax xiirashada loogu hor mariyo, kuwa kalana laga dambaysiiyo.

Marka uu intaas dhameeyo xaajigu MINA ayuu kusoo laabanayaa oo joogayaa saddexda maalmood ee ayaamu tashriiqa.

## SADEXDA MAALMOOD EE MINA LA JOOGAYO

## (AYAAMU TASHRIIQ)

Maalmaha bisha Dul-xijjah tahay 11, 12 iyo 13 waxaa la yiraahdaa ayaamu tashriiq, xaajiguna wuxuu joogayaa maalmahaas iyo habayna-



www.alukah.net

doodaba MINA, maalintii inuu Makka aado oo Xaramka kusoo tukado waa u banaantahay, laakiin habeynada inuu Mina ku hoydaa waa waajib. Maalmahaas iyaga ah xaajigu wuxuu samaynayaa dhagax-tuur kaliya.

## QAABKA DHAGAXA LOO TUURTO.

Sadexdaas maalmood maalin kasta wuxuu tuuranayaa dhagxaanta, sadexda god ayuu midba todoba dhagax ku ridayaa, wuxuu ka bilaabayaa midka ugu horeeya marka Mina laga yimaado, todoba dhagax oo galayda ama digirta



الألوكة
www.alukah.net

waaweyn le'eg ayuu ku tuurayaa, kadibna inta dhinac u baxo oo qiblada u jeesto, gacmahana kor u taago ayuu aad u ducaysanayaa.

Wuxuu aadayaa godka labaad asagana todobo dhagax inta ku tuuro ayuu sidaas oo kale u ducaysanayaa, godka sadexaad ayuu haddana todoba dhagax ku tuurayaa, horey ayuuna usii baxayaa oo degaankisii ayuu ku laabanayaa.

Intaas ayuu xaajigu sadexda maalmoodba samaynayaa.

Xiliga dhagxaanta la tuurtaana waa waqtiga salaadda duhur ilaa



الألوكة
www.alukah.net
00201156800207

qoraxdu ka dhacayso, haddii uu ka gaari waayana habaynkii ayuu tuuranayaa.

Xaajiga waxaa u bannaan maalinta labaad markuu dhagaxa tuurto inuu tago, oo maalinta saddexaad iska daayo, waxaase shardi ah inaan MINA qorraxdu ugu dhicin, haddiise MINA qorraxdu ugu dhacdo

waa inuu baryo oo maalinta saddexaadna tuurto. Inuu saddexda maalmood MINA ku dhamaysto ayaana u fadli badan.

Maalmahaas Mina la joogo xaajigu waa inuu ogaadaa inuu weli



www.alukah.net

hawlihii Xajka ku jiro, xumaan oo dhana iska ilaaliyo, waqtigiisana Cibaado uga faa'idaysto, salaadaha Jamaaco ku tukado, Masjidka Al-Kheyf [1] inuu ku tukadana ku dadaalo, rasuulku ﷺ wuxuu yiri: (Masjidul-Kheyf waxaa ku tukatay toddobaatan Nabi)

Marka xaajigu intaas sameeyo hawshii xajku waa u dhamaatay, wuxuu u laabanayaa Makkah, ilaa meeshii uu ka yimid ka aadayana halkaas ayuu joogayaa,

---

(1) Masjidka Al-kheyf: waa Masjidka weyn ee marka aad Mina ka timaaddid oo goobta dhagax-tuurka u dhawdahay bidix kaa qabanaya.



الألوكة
www.alukah.net

xilligaas uu makkah joogo xaajigu waa inuu ka faa'iadaysto kuna dadaalo dawaafka iyo salaadda, Masjidka xaramkana Jameecooyinka ku tukado, salaada lagu tukado masjidka Xaramku waxay la ajar tahay boqol kun oo salaadood oo Masjid kale lagu tukaday.

## DAWAAFUL - WADAAC

Marka la gaaro waqtigii xaajigu dhulkiisa ku laaban lahaa,

oo uu Makka ka guurayo waxa ugu dambeeya oo uu sameeyaa waa inuu Masjidka ku dawaafo, qaabkii dawaaful Ifaadaha oo kale,



الألوكة
www.alukah.net

dawaafkaan dambana waxaa la yiraahdaa DAWAAFUL WADAAC ama dawaafka sagootinta.

Marka uu xaajigu dawaafkaas dhamaysto oo masjidka ka baxayo wuxuu hormarinayaa lugta bidix wuxuuna oranayaa:

اللَّهُمَّ صَلِّ عَلَى مُحَمَّدٍ وَسَلَّم ، اللَّهُمَّ إِنِّي أَسْأَلُكَ مِنْ فَضْلِك

Dawaafkaas marka uu xaajigu sameeyana dhulkiisii ayuu ku laabanayaa, waxaana Sunno ah in biyaha Zamzamka la qaato marka la baxayo, dadka xanuu-nsana la waraabiyo, lagu kor-



الألوكة
www.alukah.net

shubo, sidaas ayaana ruulku samayn jiray ﷺ.

**F.G.** haweenka dhiigga qaba dawaafkaani waa ka dhacayaa haddii ay dawaafkii Xajka maalinta tobnaad guteen.

## BOOQASHADA MADIINO

Inta badan shirkadaha u adeega xujayda, waxay xujeyda booqasho ahaan u geeyaan Madiina marka xajka la guto kadib ama kahor, magaalada Madiina iyo masjidkeedaba fadli aad u weyn ayay leeyihiin, inta xaajigu Madiina joogo waxaa laga rabaa inuu ku



الألوكة
www.alukah.net

dedaalo jamaacada Masjidka Nebiga ﷺ, marka uu booqanayo qabriga Nebiga ﷺ, iyo qubuurta Asxaabta iyo qubuurtii Shuhadada waxaa laga rabaa inuu axkaamta sharciga ah kusocdo, sidii sharcigu u jideeyey in Qubuurta loo siyaartana ku ekaado, xad-gudubyadana iska ilaaliyo, sida in qabriyada derbiya-dooda la isku xoqo oo lagu kor ducaysto, loo dan sheegto oo dheef la weydiisto ama dhib laga magan galo, arrimahaasina waa Shirki ee xaaji iska ilaali, in meelaha taarii-khiga ah la barakaysto, dhammaan



www.alukah.net

khaladaadkaas waa in xaajigu iska ilaaliyo, cibaadadiisana ku saleeyo habkii rasuulku ﷺ noo jideeyey, iiga daydana na yiri.

## KHALADAADKA GUUD EE XUJAYDA

Khaladaadkani waa kuwo aan waqti ku koobnay

### 1. Raga iyo Haweenka oo aan kala xijaaban.

Xilliga xajku aad ayuu u shaqo badan yahay una cariiri badan-yahay, xujayduna aad ayay u daallanyihiin, sidaas oo ay arintu tahay xaajiga uma banaynayso inuu



www.alukah.net

is dhigto, waajibaadka sharciga dayaco, akhlaaqda wanaagsanna ka tago.

Raga iyo haweenka waxaa ku waajib ah inay kala xijaabtaan, meelaha haweenku deganyihiin oo ku nasanayaan raga uma banaana inay iska galaan, ee waa in xujaydu xijaabka iyo xushmada aad u ilaaliyaan.

## 2. Dadka tukanaya oo la iska hor maro

Xaajigu waa inuu iska ilaaliyo inuu hormaro dadka tukanaya, inuu sutro la'an tukado ama meelaha dadku ku dawaafayaan uu ku



الألوكة
www.alukah.net

tukado oo jidka ka xiraana uma banaana, rasuulku ﷺ wuxuu ku tilmaamay qofkii qof tukanaya hor maraa inuu yahay Sheydaan, marka Xaaji tilmaantaas inaad yeelato iska ilaali.

### 3. Waqtiga oo aan sidii ku haboonayd looga faa'idaysan.

Waqtiga hawlaha xajka inta badan la gutaa waa tobanka hore ee Dul-xijjah, waana waqti aad u fadli badan, camal kasta oo Maalmahaas la sameeyana waa ka fadli badanyahay camalada waqtiyada kale la sameeyo, goobta uu xaajigu joogaana waa



الألوكة
www.alukah.net

xaramkii, salaad kasta oo aad masjidka Xaramka ku tukataa waxay la ajar tahay boqol kun oo salaadood oo meel kale lagu tukado, marka xaajigu waa inuu waqtiga iyo goobta uu joogo aad uga faa'idaysto, wax walba oo aan Maslaxad adduun iyo mid aakhiro ugu jirinna iska ilaaliyo, daqiiqad xilligaas kamid ah inay ka khasaartana iska ilaaliyo.

## MARKAAD SOO XAJISID

Xaajigu marka uu xajka u dhaqaaqayo waxaa la rabaa inay ka go'antahay inuu xajka kasoo laabto asagoo danbiyadiisii oo dhan la



www.alukah.net

dhaafay, dambina ka ah maalintii hooyadi dhashay, tillaabo kasta oo uu fadligaas weyn ku heli karana uusan dayicin, waxaa kaloo xaajiga laga rabaa inuu go'aansado inuu dembiyadii hore iska soo dhaqo kuwa kalana uusan u laaban.

Marka xaajigu soo laabto waa inuu xumaan walba oo uu samayn jiray iska ilaaliyo, ruux isa soo nadiifiyay mar dambana inuu is wasakheeyo aan rabin sidiisana u dhawrsado, marka xaaji iska ilaali in mar dambe lagugu arko xumaantii aad ka xajisay.



الألوكة
www.alukah.net
00201156800207

Waxaa halkaas ku dhamaaday qoraalkii koobnaa ee an ugu tala galay inuu xaajiga ka caawiyo siduu camal kaan weyn u gudan lahaa, iyo khaladaadka la rabo inuu iska ilaaliyo, xaajiyada qoraalkan akhristay waxaan ka codsanayaa wixii khalad ah ee aan galay inay iga toosiyaan, aniga iyo waalidkayna inay noosoo duceeyaan inta ay ku jiraan xajka iyo kadibba.

waxaan Allaah uga baryayaa dhammaan xujayda inuu xajka ka aqbalo, xajkoodana ka dhigo



الألوكة
www.alukah.net
00201156800207

mid dambiyadoodii hore lagu dhaafo, kuwa dambana ka ilaaliya.

(رَبَّنَا تَقَبَّلۡ مِنَّآ إِنَّكَ أَنتَ ٱلسَّمِيعُ ٱلۡعَلِيمُ)

(وَتُبۡ عَلَيۡنَا إِنَّكَ أَنتَ ٱلتَّوَّابُ ٱلرَّحِيمُ)

(ٱلۡحَمۡدُ لِلَّهِ رَبِّ ٱلۡعَٰلَمِينَ)



الألوكة
www.alukah.net

# TUSMADA BUUGGA


| CINWAANKA | BOGGA |
|---|---|
| Arar | 5 |
| Fadliga xajka | 10 |
| Noocyada xajka | 15 |
| Xirashada cumrada | 17 |
| Waxyaabaha xaaraamta ka ah qofka cumrada xirtay | 22 |
| Habka loo cumraysto | 28 |
| Qaabka xajka loo guto | 44 |
| Hawlaha maalinta sideedaad | 45 |
| Hawlaha maalinta sagaalaad | 49 |
| Hawlaha maalinta tobnaad | 57 |
| Sadexda maalmood ee Mina la joogayo (Ayaamu Tashriiq) | 69 |
| Dawaaful-wadaac | 74 |
| Booqashada Madiina | 76 |
| Khaladaadka xujayda ka dhaca | 78 |
| Markaad soo xajisid | 81 |




www.alukah.net

www.alukah.net
0020115680020

الألوكة
www.alukah.net

الألوكة
www.alukah.net

الألوكة
www.alukah.net
00201156800207

الألوكة
www.alukah.net

الألوكة
www.alukah.net

الألوكة
www.alukah.net
00201156800207

الألوكة
www.alukah.net
00201156800207

الألوكة
www.alukah.net
00201156800207

## دَليل الحَاج بِاللُّغَةِ الصُّومَالِيَّة

**Buuggaan waxaad ka helaysaa:**

- ✓ Qaabka xajka loo guto oo faah faahsan.
- ✓ Tillaabooyinka uu Xaajigu qaadayo marka uu xajka xirto illaa uu dhamaynayo.
- ✓ Arrimaha aan u bannaanayn xaajiga inta uu Xaj ama Cumro ku jiro.
- ✓ Axkaamta ragga iyo haweenku ku kala duwanyihiin inta la xajinayo.

I.S.B.N. 978-977-10-3370-7

الألوكة
www.alukah.net